



**Lesli C. Myers-Small, Ed.D.**  
Superintendent of Schools  
Rochester City School District  
131 West Broad Street  
Rochester, New York 14614  
[lesli.myers-small@rcsdk12.org](mailto:lesli.myers-small@rcsdk12.org)  
[www.rcsdk12.org](http://www.rcsdk12.org)

April 14, 2021

Qoysaska iyo Ardayda Qaaliga ah Dugsiyada Degmada Rochester,

Waxaanu bilownay in aan qorshaynta sanad dugsiyeedka 2021-2022, diirada shaqaduna waa in arday badan lagu soo celiyo shaqsi ahaan Sebtemberkan. In kasta oo Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC) ay dhawaan soo saareen nidaam cusub oo yareynaya shuruudaha kala fogaynta bulshada ay aheen lix haddana ay tahay saddex cagood, RCDSD waa inay ka qaadataa talooyinka Gobolka New York. Waxaan ku rajo weynahay in Gobolku qaadan doono tilmaamo leh xaddidaadyo ka yar COVID-19, sidaa darteed waxaan horay ugu soconnaa qorshayaal u oggolaan doona arday badan inay ku soo noqdaan shaqsi ahaan sannad dugsiyeedka soo socda. **Haddii aysan jirin xayiraad uu san saarin Gobolka New York, dhammaan ardayda waxay tagi doonaan iskuulka shaqsi ahaan sidii ay ahaan jirtay kahor xiritaankii COVID.**

Laga bilaabo Sebtember 8, 2021, Degmada Dugsiga Magaalada Rochester waxay ku laaban doontaa dugsiga shan maalmood usbuucii shaqsi ahaan wax u barashada ka dib saddexda cagood ee xayiraadaha kala fogaynta bulshada. Dhammaan ardayda dhigata fasallada Pre-K - 12 waxay toos uga heli doonaan macallimiintooda shan maalmood usbuucii, maaddaama Arbacadu aysan sii ahaan doonin ardyaga inuu kali ahaantiisa wax is baro. **Waxaan soo bandhigi doonaa 100% ikhtiyaar waxbarashada guryaha** si aan ula jaanqaadno qoysaska aan ku kalsooneyn ku celinta caruurtooda iskuulka shaqsi ahaan.

*Haddii aad dooranaysid ikhtiyaarka waxbarashada guryaha, fadlan wac dugsiga ilmahaaga si aad ugu wargeliso. Waxa kale oo aad ka dooran kartaa khadka tooska ah iyada oo loo marayo Xariirka Waalidka ee PowerSchool oo ah <https://www.rcsdk12.org/parentportal>.*

*By making this decision, you are committing to have your children learn remotely for the first semester of school, which ends on Friday, January 28, 2022.*

*Go'aankan markii aad gaartid, waxaa kaa go'an in carruurtaadu gurga ay wax ka bartaan semesterka ugu horreeya ee dugsiga, kaasoo dhammaan doona Jimcaha, Janaayo 28, 2022.*

Families who want their children to take part in 100% remote learning must respond by Friday, May 7, 2021.

*Qoysaska doonaya inay caruurtoodu kaqeyb qaataan 100% waxbarashada guryaha waa inuu ka jawaabo Jimcaha, Maajo 7, 2021.*

**If we do not hear from you by May 7, your children will automatically be enrolled as in-person students.**

**Haddii aadan soo wecin ama kaa maqalin inta ka horreysa Maajo 7, carruurtaada si toos ah ayaa loogu qori doonaa ardayda shaqsi ahaan**

In kasta oo maalinta koowaad ee dugsigu u muuqato meel fog, haddana waxaan rabaa inaan kula socodsiiyo qorshayaashan hadda, maaddaama macluumaadkani muhiim u yahay Degmadu inay dhisto jadwalka ardayda, u diyaariso dhismayaasha dugsigeenna, isku dubaridka gaadiidka, **iyo qorsheynta laba koox oo ka mid ah shaqaalaha macallimiinta - mid u heellan waxbarista ardayda shakhsi ahaaneed iyo tan kale ee waxbarista ardayda guryaha wax ku baranaayo.**

Ardayda ayaa ah ahmiyadayada koowaad, waxayna wadaan go'aan kasta oo aan qaadano. Fadlan faham in inta aan taaganahay rabitaankeyga ah in ardaydu ay ku soo laabtaan dugsiga, macluumaadka cusub iyo tilmaamaha cusub ee ka imanaya Gobolka New York ayaa is beddeli kara, taas oo nooga baahan doonta inaan ka leexanno khorshaha oo aan wax ka beddelo.

**HADDII Gobolka New York uu nooga baahan yahay inaan ku furno xeerar adag,  
Hoos waxaa ku qoran qorshayaasha waxbarasho ee aan u baahan nahay inaan raacno:**

- **Xaddidaadaha: 6 Cagood ee Boos kala Dheerinta Bulsho ee Fasallada**
  - **Shaqsi- ahaan / HYBRID (isku darka shaqsi ahaan iyo guri ku barasho)**
    - Shaqsi ahaan / HYBRID: Ardayda dhigata dugsiga laba maalmood oo isku xigta usbuucii si ay u helaan waxbarid shakhsiyeed. Maalmahan waxay noqon doonaan Isniinta-Talaado ama Khamiista-Jimcaha. Saddexda maalmood ee kale ayaa la bixiyaa.
    - ADEEGYADA GAAR AH EE shaqsi ahaan/ HYBRID: Ardaydu waxay xadiraan dugsiga afar maalmood usbuucii si ay u helaan waxbarid qof ahaaneed, iyadoo Arbacada ay tahay waxbarid fog oo la bixiyo.
  - **100% GUUL:** Ardaydu waxbay bartaan dhammaan shanta maalmood.

	Monday	Tuesday	Wednesday	Thursday	Friday
	Isniinta	Talaado	Arbaco	Khmiis	Jimcaha
<b>In-Person/ Hybrid Group 1</b>	Remote	Remote	Remote	In-Person	In-Person
Qofka ahaan / Kooxda isku dhafan 1	Guul	Guul	Guul	Qof ahaan	Qof ahaan
<b>In-Person/ Hybrid Group 2</b>	In-Person	In-Person	Remote	Remote	Remote
Qofka ahaan / Kooxda isku dhafan 2	Qof ahaan	Qof ahaan	Guul	Guul	Guul
<b>In-Person/ Hybrid Specialized Services</b>	In-Person	In-Person	Remote	In-Person	In-Person
Qofka ahaan / Adeegyada Gaarka ah	Qof ahaan	Qof ahaan	Guul	Qof ahaan	Qof ahaan
<b>100% Remote</b>	Remote	Remote	Remote	Remote	Remote
100% Guul	Guul	Guul	Guul	Guul	Guul

- **Shuruuda Xiritaanka Buuxda ee Dugsiyada**
  - Dhammaan ardayda waxay wax ka bartaan guryaha shanta maalmood usbuucii, iyadoo dhammaan fasallada la gaarsiyo gebi ahaanba.

Wixii warar ah ee kusoo kordha waan idinla socodsiiin doonaa marka horay aan u socono. Waan ku faraxsanahay dulqaadkiina iyo dabacsanaantaada joogtada ah, maadaama aan ka shaqeyneyno qorsheynta sanad dugsiyeedka 2021-2022 ee guuleysta. Waad ku mahadsantiihin taageeradeena.

Si daacad ah,

Dr. Lesli C. Myers-Small  
Superintendent of Schools